

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2017

SAYNIS



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND



WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

Imtixaanka Fasalka 8aad 2017

Amin 2 Saac iyo 10 Daqiiqo Akhris ah

SAYNIS

TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:

QAYBTA	DHIBCAHA
Qaybta 1aad : Goobo Geli	20 Dhibcood
Qaybta 2aad: Ka Jawaab Dhammaan Su’aalaha	80 Dhibcood
Wadarta: 100 Dhibcood	


Waxaa iska leh saxaha

QAYBAHA	DHIBCO
QAYBTA 1AAD	
QAYBTA 2AAD	
WADAR	%


QAYBTA 1AAD: GOOBO GALI JAWAABTA SAXDA AH

20 DHIBCOOD

1. Waa maxay maxsuulka ku calaamadsan X?



- A) Bays
B) Asiidh
C) Busbo iyo biyo
D) Biyo kaliya
2. Dhirtu waxay qashin ahaan u saaraan
A) H_2O
B) O_2
C) CO_2
D) H_2
3. Aalada lagu cabiro roobka da'ay waxaa loo yaqaan
A) Heer-kulbeeg
B) Roob beeg
C) Cadaadis beeg
D) Jiheeye beeg
4. Xubinta maamusha jirka aadamaha waa
A) Beerka
B) Caloosha
C) Maskaxda
D) Kalyaha
5. Hadii wiil dhagax dhulka sare kor ugu qaaday xoog dhan 10 N kadibna la saaray meel joogeedu yahay 3 mitir. Soo saar hawsha laqabtay
A) 40 N/M
B) 13 N/M
C) 7 N/M
D) 30 N/M
6. Qofku markuu fuuq baxo waxaa la siiyaa
A) ORS(Oo aar es)
B) Barastimool
C) Binishiliin
D) Banadool
7. Shaqada waynaysada waa
A) In lagu kaydiyo unugyada
B) In lagu arko unugyada
C) In lagu abuurro unugyada
D) In lagu qalajiyo unugyada
8. Adigoo adeegsanaya sawirada, qaabkee ayay u saxan tahay silsilada cuntadu



- A) 1,3,4,2
B) 3,2,1,4
C) 3,1,4,2
D) 4.1.2.3
9. Khaafiyada waxay shaqada ka dhigtaa mid
A) Fudud
B) Culus
C) Culays iyo fudayd
D) Fudayd iyo culays
10. Halbeega tamartu waa
A) Niyuutan
B) Juul
C) Garaam
D) Mitir



QAYBTA 2AAD: KA JAWAAB DHAMMAAN SU'AALAHHA SOO SOCDA 80 DHIBCOOD
SU'AASHA 1AAD 10 DHIBCOOD

- a) Dhamaystir jaantuskaan hoose adigoo adeegsanaya erayada saxda ah ee ku jira sanduukha. Raac tusaalaha lagu siiyay. **8 Dhibcood**

Liinta	Caloosha dadka	Caanaha dhanaan	<u>Khudaarta cagaaran</u>
Cinabka	Baytariyada baabuurta	Nafaqeyayaasha	

Nooca Asiidha	Meesha laga helo
Askoorbic	<u>Khudaarta cagaaran</u>
Sitrik	
Laktik	
Salfiyuurik	
Naytarik	
Haydrakaloorik	

- b) Maxaa loo adeegsadaa tusayaasha?

_____ **2 Dhibcood**

SU'AASHA 2AAD 7 DHIBCOOD

- a) Xaawo ayaa adeegsatay xoog dhan 15N kuna qaaday walax waxayna saartay meel joogeedu tahay 4 M. Soo saar hawsha la qabtay.

_____ **4 Dhibcood**

- b) Sheeg macnaha sayniseed ee erayga "HAWL".

_____ **2 Dhibcood**

- c) Qor qaacidada lagu raadiyo tamarta. _____ **1 Dhibic**

SU'AASHA 3AAD

10 DHIBCOOD

Sawirkani wuxuu ku tusayaa qayb ka mid ah xayawaanada



Ka jawaab su'aalaha soo socda adigoo adeegsanaya lambarada ku dul qoran xayawaanka

a) Sheeg labo Xayawaan oo ku noolaan kara biyaha?

_____ 2 Dhibcood

b) Sheeg sedex xayawaan oo ukun dhala xilliga dhalmada?

_____ 3 Dhibcood

c) Sheeg sedex xayawaan oo ilma dhala xilliga dhalmada?


_____ 3 Dhibcood

d) Sharrax waxtarka xayawaanka ku calaamadsan lambar 3 ?

_____ 2 dhibcood

SU'AASHA 4AAD
10 DHIBCOOD

Isku aadi Mashiinada fudud ee A, B, C, D, E, F iyo Magacyadooda. Tusaale ayaa lagu siiyay.



Qaybta	Magaca mashiinka
A	
B	
C	
D	Sallax janjeer
E	
F	

SU'AASHA 5AAD
10 DHIBCOOD

a) Kala saar kadibna tusaale keen waxay kalayihiin dhaqashada digaaga iyo shinnida?

4 Dhibcood

b) Sharrax kooban ka bixi waxtarka dhaqashada xayawaanka?

3 Dhibcood

c) Tax seddex ka mid ah miraha beeraha soomaaliya ka baxa?


3 Dhibcood



SU'AASHA 6AAD

11 DHIBCOOD

Sawirkani wuxuu u taagan yahay ahraamta cuntada. Ka jawaab su'aalaha soo socda.



a) Sheeg quud sameeyaha Ahramka cuntada ee kore?

_____ 2 Dhibcood

b) Sheeg dheefsadaha 1aad ee ahraamkan cuntada?

_____ 2 Dhibcood

c) Sheeg dheefsadaha 2aad ee ahraamkan cuntada?

_____ 2 Dhibcood

d) Sharrax kooban ka bixi meesha uu cawsku ka helo tamarta?

_____ 2 Dhibcood

e) Adigoo adeegsanaya ahraamka kore, Sawir hal silsilad cunto oo ku dhamaanaysa dheefsadaha 3aad?


_____ 3 Dhibcood

SU'AASHA 7AAD

6 DHIBCOOD

Sawirkaani wuxuu muujinaya nooc ka mid ah dayax gacmeedka.

A) Waa maxay dayax gacmeed?



2 dhibcood

B) Qeex labo ka mid ah shaqooyinka dayax gacmeedka?


4 Dhibcood

SU'AASHA 8AAD

6 DHIBCOOD

Sawirkan hoose wuxuu muujinaya mareeg koranto.

A) Waa maxay shaqada qaybta J?



2 dhibcood



B) Sheeg faaiidoonka laga helo qaybta ku calaamadsan X ?

_____ 2 Dhibcood

C) Sharraax Sida birlabtu u soo jiidato birlab kale?

_____ 2 Dhibcood

SU'AASHA 9AAD

10 DHIBCOOD

A) Isku aadi cudurada iyo noolaha sababa adigoo raacaaya tusaalaha lagu siiyay.

Cudurka	Xarafka maqan	Noolaha sababa
1. Hargab	D	A. Kaneecad Anoofalas
2. Duumo		B. HIV
3. Aydhis		C. bakteeriya
4. canbaarta		D. Fayras hargabka
5. Waraabowga		E. Fangay

B) Sharraax khasaaraha ay miinadu ama qaraxu u gaysto aadamaha?

_____ 2 Dhibcood

Dhammaad